



Sawir: Sheekadayda Ardayda
mystoryworkshops.org



KA DHIGISTA CADDALADDA MID DHAB AH IYADOO SARE LOO QAADAYO XUQUUQDA SHACABKA

Caddaaladdu waa jid lagu gaadho beel caafimaad qabta oo jajaban iyo hadaf ayna dhammaanteen ka faa'idayno. Portland, si aad u barwaaqowdo, aqoonyahan u noqoto, u caafimad qabto una caddaaladna u hesho, dadka oo dhan waa inay galaangal u yeeshaan adeegyada Magaalada.

Horumarinta caddaaladdu waxay udub-dhexaad u tahay kasbashada qorshayaasheena mustaqbalka.

Portland waxay noqonaysaa magaalado qoomiyad ahaan, sinji ahaan iyo da' ahaanba dadka ku nooli kala duwan yihiin oo leh soogalooti badan. Isla markaas, beelaha kala duwan ee Portland aalaaba uma sinna galaangal u yeelashada fursadaha si ay sare ugu qaadaan fayoaqabkooda oo kasbadaan waxa ugu badan ee ay kasban karaan. Sinnaan badan magaalada wuxuu lama-huraan u yahay guusheena wakhtiga fog.

Horumarinta sinnaanta Portland waxay ka dhigan tahay horumarinta sida magaaladu u shaqayso – oo ka bilaabanta sida dawladda Hoose adeegyada iyo sida ay galaangalka ugu leeyihiin u siiso dadka deggan.

QORSHAHA XUQUUQDA SHACABKA CINWAANKA VI

Golaha Magaalada Portland wuxuu meel-mariyey Qorshaha Xuquuqda Shacabka Cinwaanka VI. Qorshuhu wuxuu qayb ka yahay dadaalka Magaalada ee ah inay hubiso in dadka midabka, naafada ah, danyarta ah, Ingiriisi ku filan aan aqoon iyo kooxaha taariikh ahaan aan si fiican loogu adeegi jirin iyo ashkhaastu ay galaangal u yeeshaan dhammaan barnaamijyada, adeegyada iyo hawlaha Magaalada.

CINWAANKA VI: BAYAANKA SIYAASADDA XUQUUQDA SHACABKA

Waa siyaasadda Magaalada Portland in qofka aan laga manciyin dheefaha ama aanu la kulmin takoor barnaamij kasta oo Magaaladu leedahay, adeeg ama hawl iyadoo lagu salaynayo qoomiyadda, midabka, waddanka qofku kasoo jeedo, ku fiicnida Ingiriisida, jinsiga, da'da, naafada, diinta, doorashada galmo, aqoonsiga jinsi ama isha dakhli. Magaalada Portland sidoo kale waxay sidoo kale ka rabtaa qandaraaslayaasheeda iyo loogu-deeqayaasha inay ku dhaqmaan siyaasaddan.





QORSHAHAN WUXUU CADDALADDA KU HORUMARINAYAA ISAGOO:

- ▶ Hubinaya in dadka oo dhan awoodaan helista dheefaha, adeegyada iyo fursadaha barnaamijyada Magaalada.
- ▶ Fulinta tarjumaad luuqadeed oo isu-duwan iyo barnaamijka xeeladda tarjumaadaha ee Magaalada, kaasi oo mideeya adeegyada ASL tarjumaada qofku xaadirka yahay.
- ▶ Qiimaynta tabashooyinka cadaaladda bey'eed si dheefaha iyo culaysyada korriinka iyo isbeddelka ay si isku mid ah u wadaagaan beelaheenu.
- ▶ Hubinta galaangal u yeelashada kaqaybqaadashada go'aan qaadashada dadwayne si dhammaan dadka Portland iyo beelaha hoos loo eego ay si buuxda uga qaybqaataan.
- ▶ Tababbarka shaqaalaha Magaalada kusaabsan Xeerka Xuquuqda Shacabka ee 1964 iyo Xeerka Naafada Maraykanka, iyo waxbarista dadwaynaha ee sida galaangal loogu yeelanayo dhawrisahan.

MAXAAD KA OGTAHAY QORSHAHA?

Horumarinaha Qorshaha Xuquuqda Shacabka Cinwaanka VI:

Ku Lugeelashada Dadwayne ee Waxtarka leh: Qof kastaa waa inuu galaangal u yeesho macluumaadka kusaabsan go'aanqaadashada saamaynaysa beesheena iyo fursadda lagaga qaybgalayo dadaalada ku lugeelashada dadwaynaha ee Magaalada. Ku lugeelasho dadwayne oo xilli hore ah macnana leh waa qayb muhiim ah oo qorshaha kamid ah.

Galaangal u yeelashada Dadka leh Ingiriisi

Xaddidan: Qof kasta waa inay haysto macluumaadka lama-huraanka u ah galaangal u yeelashada barnaamijyada, adeegyada iyo hawlaha Magaalada. Haddaad ugu baahan agabka luuqaddaada koowaad, kaliya waydii.

Galaangal u Yeelashada Barnaamijyada, Adeegyada iyo Hawlaha:

Qof kastaa waa inuu awoodo inuu galaangal u yeesho barnaamijyada, adeegyada iyo hawlaha Magaalada si dhib la'aan ah. Magaaladu waxay siin doontaa waafajino dadka leh naafada.

Cadaaladda Bey'eed: Beelaha midabka iyo danyarta ay yihiin dartood waa inayna kasoo gaadhin raadad taban oo caddaalad darro ahi go'amada, adeegyada ama barnaamijyada Magaalada. Cinwaanka VI ee Xeerka Xuquuqda Shacabka wuxuu u fidiyaa dhawris, wax badan ka raadso adoo la xidhiidhaya Maareeyaha Barnaamijka hoos ku qoran.

Xalka Cabashada: Haddaad dareento in lagugu sameeyey takoor kusalaysan qoomiyadda, midabka, ama waddanka qofku kasoo jeedo waxaad fayl garayn kartaa cabasho. Ku takoorka qofku waddanka uu kasoo jeedo waxa kamid ah midka kusalaysan awooda xaddidan ee qofku wax ku akhriyi karo, ku qori karo, ku hadali ama fahmi karo Ingiriisida. Waxaanu u halgamaynaa inaanu ku xallino cabashooyinka heerka u hooseeya ee suurogal ah.

Qorshaha Xuquuqda Shacabka Cinwaanka VI wuxuu sharxayaa sida Magaaladu u fulin doonto mabaadii'dan. Booqo www.portlandoregon.gov/OMF/CivilRights si aad u hesho war dheeraad ah.

Si ay u caawiso hubinta galaangal u yeelasho loo siman yahay ee barnaamijyada, adeegyada iyo hawlaha Magaalada, Magaalada Portland waxay siin doontaa tarjumaad, siyaasado/dariiqooyin in macquul ah la beddelay iyo kaalmooyin/adeegyo/foormaatyo beddel ah dadka naafada ah. Waafajino, tarjumaado, cabashooyin, iyo macluumaad dheeraad ah, la xidhiidh Shoshanah Oppenheim, Maareeyaha Barnamijka Xuquuqda Shacabka Cinwaanka VI adoo taleefanka adeegsanaya 503-823-2559 ama iimaylkan shoshanah.oppenheim@portlandoregon.gov. TTY 503-823-6868, ama Oregon Relay Service: 711.